

XAASHIDA MACLUUMAADKA ADEEGYADA LA XIDHIIDHA HEALTHCHEK IYO UURKA

HEALTHCHEK - HUBSO!

Ma og tahay in barnaamijka Medicaid ee Ohio ay ku jirto adeegyada **Healthchek** ee carruurta ilaa 21 jir ah? (Marmarka qaar adeegyadan waxa la dhahaa EPSDT.) adeegyada **healthchek** carruurta waxay ku caawiyaan inay caafimaad ku joogaan waxay nusqaamiyaan fursadaha xanuunsadka iyadoo la daawaynayo dhibaatooyinka caafimaad xilli hore. Adeegyada **healthchek** oo dhami waa bilaash. Waxaad ka heli kartaa caawimo iyo macluumaad adoo la xidhiidha Iskuduwaha Healthcheck ee degmadaada ama qorshehaaga daryeelka la maareeyey iyo adoo booqdo <http://medicaid.ohio.gov/FOROHIOANS/Programs/Healthchek.aspx>.

Adeegyada Baadhista

Dhakhaatiirtu waxay rabaan carruurta inay maraan baadhista ilme caafimaad qaba (well-child checkups) (baadhiso) intay korayaan sidaa darteed dhibaatooyinka caafimaad xilli hore ayaa la heli karaa. Baadhisaha ay daboosho **Healthchek** waxa kamida:

- baadhiso jidheed
- baadhiso arageed
- baadhiso ilkeed
- baadhiso maqal
- baadhiso cunteed
- Baadhiso caafimaadka maskaxda
- baadhiso korriin
- tallaalo, haddii loo baahdo

Hooyooyinku waa in ugu yaraan ay maraan hal baadhis dhalmada kahor carruurtuna baadhiso maraan markay dhashaan, 3 ilaa 5 maalmood markay jiraan iyo markay jiraan 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood. Intaas kadib carruurta waa inay maraan ugu yaraan hal baadhis sannadkii. Carruurta oo dhan waa inay maraan baadhista sumawga naxaasta 'lead'.

Adeegyada Daawaynta

Haddii dhakhtarku uu arko dhibaato xilliga baadhista, dhakhtarku wuxuu ku siin karaa daawaynta ama kuu gudbin karaa dhakhtar kale. **Healthchek** wuxuu daboolaa adeegyo daawayn. Adeegyada qaar waxay u baahan karaan oggolaansho. Haddii ilmahaagu aanu ku jirin qorsheha daryeelka la maareeyey una baahan yahay oggolaanshaha adeegga, dhakhtarkaagu wuxuu u baahan doonaa inuu ka codsado Ohio Medicaid adeegga. Haddii ilmahaagu uu ku jiro qorsheha daryeelka la maareeyey, dhakhtarkaagu wuxuu ka codsan doonaa oggolaansho qorsheha. Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka ay gaadhay Ohio Medicaid ama qorsheha daryeelka la maareeyey ee ilmahaaga, waxaad waydiisan kartaa dhagaysi. Ka hubi Iskuduwahaaga Healthcheck macluumaad dheeraad ah.

Adeegyada Taageerada

Magacyada, ciwaanada iyo lambarada tilifoonada Iskuduwahaaga Healthchek ee degmooyinka oo dhan waxa laga heli karaa <http://medicaid.ohio.gov/Portals/0/For%20Ohioans/Programs/countycoordinators.pdf> ama adoo wacaya Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska Degmadaada. Haddaad u baahato dhakhtar, dhakhtar ilko ama daryeel caafimaad bixiye kale, Iskuduwaha Healthchek ee degmadaada ayaa ku siin kara liis. Iskuduwahaaga Healthchek wuxuu sidoo kale kaa caawin karaa inaad samayso ballamaha dhakhtarka iyo inuu kaa caawiyo inaad hesho gaadiid ilaa dhakhtarka. Haddii ilmahaagu leeyahay qorsheha daryeel la maareeyey, qorshuhu wuxuu sidoo kale kaa caawin karaa samaynta ballamaha dhakhtarka waxaanu ku siin karaa gaadiid ilaa dhakhtarka. Qorshuhu wuxuu sidoo kale ku siin karaa liis dhakhaatiira qorshehooga. Waad u doonan kartaa websaaydka qorsheha macluumaad badan.

Waxaad waydiisan kartaa Iskuduwahaaga Healthchek inuu kuu sameeyo gudbinno barnaamijka Head Start, Dumarka, Cunugyada, iyo Carruurta (WIC), Igu Caawi Inaan Koro, iyo Xafiiska Carruurta Qabta Naafo Caafimaad. Iskuduwahaaga Healthchek wuxuu ku siin karaa magacyada hay'ado kale kuwaasoo kaa caawin kara inaad hesho hu', hooy, cunto, iyo adeegyo kale. Sidoo kale waad gudbin kartaa su'aalaha adoo isticmaalaya foom xidhiidhka kombuyuutarada ah oo laga helo <http://medicaid.ohio.gov/CONTACT.aspx>.

Fadlan buuxi macluumaadkan soo socda si aad nooga caawiso inaanu ku/ siino adeegyada **Healthchek** adiga iyo/ama ilmahaaga. Haddaanad fahamsanayn qayb ama dhammaan foomkan, fadlan la xidhiidh Iskuduwaha Healthchek ee degmadaada. **Fadlan ku soo celi xaashidan macluumaadka** Iskuduwaha Healthchek ee Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Degmadaada, ama **dib ugu soo dir gal waraaqeedka baakaddan**. **Fadlan ku xafid warqadda dahaadhka diiwaanadaada si aad markale u tixraaci karto.**

Macluumaadkaaga

| | | | | |
|-----------------|----------------------------|----------|---------|-----------------------|
| Magaca Hore | Magaca Dambe | | | |
| Lambarka Kiiska | Ciwaanka Sakadda, Apt. No. | | | |
| Magaalada | Gobolka | Zip Code | Degmada | Taariikhda Dhalashada |
| limaylka | Lambarka Tilifoonka | | | |

Macluumaadka Ilmahaaga

| | |
|---------------|-----------------------------------|
| Magaca Ilmaha | SSN ama Lambarka Medicaid Billing |
| Magaca Ilmaha | SSN ama Lambarka Medicaid Billing |
| Magaca Ilmaha | SSN ama Lambarka Medicaid Billing |
| Magaca Ilmaha | SSN ama Lambarka Medicaid Billing |

Ilmahaagu ma qoran yahay qorsheha daryeelka la maareeyey ee Medicaid?

- Haa. Qorshe
- Maya. Kahor isqorista qorshe, hubso in dhakhtarkaaga ama rugtaadu (ama ka ilmahaagu) uu ku jiro liiska bixiyeyaasha qorsheha.

Adeegyada Baadhista Healthchek

Healthchek wuxuu daboolaa baadhiso caafimaad, tallaalo (mudis), cilmiga caafimaadka, iyo baadhiso shaybaadh oo la mariyo qof kasta oo ku jira Medicaid kana yar 21 jir. Wuxuu sidoo kale daboolaa baadhiso caafimaad ee aragga, ilkaha, maqalka, cuntada, nafsiiyeed, iyo maskaxeed oo dhammaystiran. Baadhitaanadani waxay muhiim u yihiin habsiga in ilmahaagu uu caafimaad qabo uuna jidh ahaan iyo maskax ahaanna korayo. Hooyooyinku waa in ugu yaraan ay maraan hal baadhis dhalmada kahor carruurtuna maraan baadhiso markay dhashaan, 3 ilaa 5 maalmood markay jiraan iyo markay jiraan 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood. Intaa kadib, carruurta waa inay maraan ugu yaraan hal baadhis sannadkii ilaa 21 jirka. **Fadlan hubi dhammaan adeegyada adiga ama ilmahaagu aad jeclaan lahaydeen inaad heshaan.**

- Baadhis caafimaad oo baahsan
- Baadhis maqal
- Baadhis arag (il)
- Baadhis caafimaadka maskaxda
- Baadhis ilig
- Baadhis kabiir:

Adeeyada Daawaynta Healthchek iyo Gaadiidka Ballamaha Daryeelka Caafimaad

Healthchek waxay daboolaa adeegyada baadhitaanada iyo daawaynta si loo daaweeyo dhibaatooyin ama xaalado baadhis lagu ogaaday. Adeegyada baadhitaanada iyo daawaynta qaar waxay u baahan yihiin oggolaansho. Haddaad u baahan tahay oggolaansho, bixiyahaagu waa inuu waydiiyaa Ohio Medicaid ama qorsheha daryeelka la maareeyey.

Iskuduwahaaga Healthchek wuxuu kaa caawin karaa samaynta ballamo caafimaad, ilkeed iyo ballamo kale waxaanu ku siin gaadiid bilaasha tagista ballamahan, haddii loo baahdo. Haddii adiga ama ilmahaagu uu qoran yahay qorsheha daryeelka la maareeyey, qorshuhu wuxuu sidoo kaa caawin karaa ballamaha gaadiidna wuu ku siin doonaa. Wuxuu sidoo kale ku siin karaa liis dhakhtaro qorshehaaga ku jira, **fadlan hubi wax kasta oo adiga ama ilmahaagu aad jeclaan lahaydeen inaad heshaan.**

- Liis dhakhtaro ah
- Gaadiidka ballamaha caafimaad ama ilkeed
- Liis dhakhtarada ilkaha ah
- Gudbinaha Igu Caawi Inaan Koro
- Liis xirfadleyaal kale ee daryeelka caafimaad
- Gudbinaha Xafiiska Qaabilsan Carruurta leh Curyaanimo Caafimaad
- Caawimo kale oo ah helista daawaynta
- Macluumaad kale oo kusaabsan halka laga helo daawayn

Adiga ama ilmahaagu ma leeyahay dhibaato u baahan ku baraarugsanaan ama daawayn (tusaale, dhib caafimaad, dhib caafimaad maskaxeed, ilme aan si caadi ah u kobcayn, iwm)? Hadday sidaa tahay, fadlan wax badan nooga sheeg tan.

Macluumaad kale oo kusaabsan taariikhda ilmahaaga

- Ilmahayga waa laga baadhay sumawga led Haa Maya Aan garanayn
 Tallaalada (mudista) ilmahaygu waa cusayb Haa Maya Aan garanayn
 Ilmahaygu wuu maray baadhitaano koboceed Haa Maya Aan garanayn

Adeegyada Taageero

Iskuduwahaaga Healthcek wuxuu sidoo kale ku siin karaa macluumaad kusaabsan adeegyada jira sida barnaamijka Dumarka, Cunugga, iyo Carruurta (WIC) iyo adeegyo kale oo la sii mariyo waaxda caafimaadka deegaankaaga iyo hay'adaha kale ee deegaanka.

Ma jeclaan lahayd macluumaad badan oo kusaabsan adeegyada? Fadlan calaamadi wixii jira oo dhan.

- Dumarka, Cunugga iyo Carruurta (WIC) Kaalmo Cunteed
 Kaalmo kulaylin Head Start
 Wax kale:

Miyuu qof qoyskiina ah (ood ku jirto) uur leeyahay? Haa Maya

Hadday HAA tahay, sheeg magaca haweenayda uurka leh.

Haddii la ogyahay, sheeg taariikhda ilmuhu ku egyahay: Bisha

Sannadka

Miyey haweenayda uurka lihi imika ugu tagtaa dhakhtar ama rug uurkeega? Haa Maya

Hadday tahay HAA, sheeg magaca dhakhtarka ama rugta.

Ma u baahan tahay adeegyo bulsheed oo kale? Haa, Cayin: Maya

Hadda miyaad ku jirtaa qosheha daryeelka la maareeyey ama HMO? Haa Maya

Hadday tahay HAA, cayin magaca qorsheha ama HMO.

(Ogow: Kahor intaanad isqorin HMO, hubso in dhakhtarkaagu ama rugtaadu ay ku jirto liiska HMO. Haddaad isqori rabto HMO mustaqbalka, hubso inaad u sheegto shaqaalaha HMO adeegyada aad jeclaan lahayd inaad hesho.)

Qiraal

Waa la i siiyey macluumaad kusaabsan Healthcek. Waan fahansanahay inaan waydiisan karo adeegyada Healthcek ama kaalmo wakhti kasta. Waan fahansanahay in la i waydiisan doono inaan saxeexo foom fasaxid gaara haddii loo baahdo macluumaadkayga caafimaad in lala wadaago cid kale.

| | | |
|----------------------------|------------|------------|
| Saxeexa | | Taariikhda |
| Saxeexa Shaqaalaha Kiiska | Taariikhda | Tilifoonka |
| Iimaylka Shaqaalaha Kiiska | | |

Shaqaalaha Kiiska: Fadlan isku dhaafi macluumaadkan qorsheha daryeelka la maareeyey ee Medicaid ee la habboon.